LIISKA HUBINTA EE KA FALCELINTA DEGDEGTA AH (way sii socotaa)

DHANKA SHARCIGA

✓ Miyay shabakadda mise hay'adaha kale isugu duba rideen dhibanaha caawinaad sharciyeed mise miyee u gudbiyeen dhibanaha qareen?

✓ Miyey qareenada ogaayeen shuruudda dabo taalo Sharciga Guri Siinta Cadaaladda Leh ee khuseysay dembiga? Miyee qodobada sharciga loo faahfaahiyay dhibanaha?

✓ Miyuu dhibanaha cabashada guri siinta cadaaladda leh ka sameeyey Waaxda Maraykanka ee Guri Siinta iyo Dhismaha Magaaloyinka mise muxuu ka sameeyey xaruunta u dhaw ee guri siinta cadaaladda leh? Cabashooyinka HUD waa qasab in la sameeyo xad gudubka laga cabanaayo goortuu dhacay hal sano gudihiisa, kiisaska maxkamadda goboleed mise dawladda federaalka waa qasab in la sameeyo labo sano ee xadgudubka markuu dhacay gudaheeda.

✓ Miyuu dhibanaha ka helay caawinaad uu ku qanco isagoo isticmaalaayo sharciga mise nidaamka maamuleed?

✓ Miyay dhibanaha wareysteen qareenada guud, qareenada dhibanaha/marqaatiga, iyo booliska ee laga wareystey habka lola dhaqmay inta geedi socodka sharci lagu jiray?

LA TALINTA IYO DHEX DHEXAADINTA

✓ Miyay bulshadda, mise dhibanaha iyo hadday ku habboon tahay dembiilaha heli kareen dhex dhexaadiyeyaal/ la taliyeyaal?

✓ Hadday xiisad jirtay, miyay hogamiyeyaalka labada dhinacba isu dayeen inay arrinta xaliyaan oo na ka hortagaan dhibaato dheeraad oo sii kacda?

✓ Miyay dugsiyaalka iyo warbaahinta u isticmaaleen dhacdada arrin wax laga barto iyagoo ku samaynaayo barnaamij wacyigelineed?

✓ Miyay hay'ada isu keentay dugsiyaalka, madaxyaalka lasoo doortey, culumada, shirkadaha guriyaha ka shaqeeyo, iyo kooxyaalka bulshadda sifo loo wada eego falcelinta dhacdada iyo in la hirgeliyo barnaamijyo mudo dheer soconaayo ee ka hortag ah?

WARBAAHINTA IYO LA XIRIIRKA DADWAYNAHA

✓ Miyay hogaamiyeyaalka muhiimka ee dadwaynaha (madaxyada lasoo doortey, culimada, saraakiisha dugsiga, dadka guri siinta ka shaqeeyo) wax ka ogaayeen dhacdada?

✓ Miyuu wakiilka kala shaqeeyey saraakiisha xaga qorsheynta jawaab dadwayneed ee ka hortag ah oo na kalsooni leh, ee ku habboon dhacdada?

✓ Miyay warbaahinta wax ka ogaayeen dhacdada? Warbixinta miyay ahayd mid xasaasi oo na sax ah, iyo miyay ahayd mid dib u heshiisiin horumarinaysay?

✓ Miyaa jawaabta lasoo dhigay warbaahinta bulshadda? Jawaabta dareen noocee bay muujinaysay?

✓ Miyay xubnaha ka falcelinta hay'adda u isticmaaleen warbaahinta bulshadda inay ku faafiyaan farriimo laga fakiray, wacan, oo na lagu bogsanaayo?

✓ Miyay xubnaha bulshadda u isticmaaleen warbaahinta bulshadda inay ku faafiyaan farriimo nacayb sifo lagu kiciyo dhibaato dheeraad?

Sifo aad u hesho maclumaad dheeraad ah mise sifo aad u samayso cabasho guri siinta khuseyso, la xiriir shirkadda kugu dhaw ee cadaaladda guri siinta mise booqo boggan

www.HUD.gov/fairhousing

High Plains Fair Housing Center
PO Box 5222
Grand Forks, ND 58206
Intake: 701-203-1077

www.highplainsfhc.org

Hawsha ee aasaasiga u ahayd daabacaaddan waxaa taageero qayb uga ahaa maalgelinta ay samaysay Waaxda Maraykanka ee Guri Siinta iyo Dhismaha Magaaloyinka. HPFHC ayaa keli masuul ka ah saxnaanta qoraalada iyo fasiraadka ku jiro daabacaadan.

KA FALCELINTA DEMBIYADA XAD GUDUBYADA XUQUUQDA MADANIGA

SHARCIGA GURI SIINTA CADAALADDA LEH APPLIES TO DEMBIYADA KU XAD GUDUBKA XUQUUQDA MADANIGA

Sharciga Guri Siinta Cadaaladda Leh ee dawladda federaalka wuxuu mamnuucayaa kala sooca lagu sameeyo macaamilka guri siinta khuseeyo ee ku salaysan midibka qowmiyad, midibka, diinta, asalka qaran, jinsiyadda (ay soo galaayaan dooqa jinsiyadda lala galmoodo iyo aqoonsiga jinsiyeed), laxaad la'aanta mise xaaladda qoys. Sharciyo badan ee goboleed iyo degmadeed ayaa sidoo kale mamnuucaan kala sooca guri siinta ee ku aadan kooxo dheeraad oo la ilaalinaayo.

Hal nooc ee kala sooca guri siinta ayaa ah hanjabka, cabsi gelinta iyo wax yeelada guri siinta la xiriiro. Tusaalooyin dhacdooyin noocaas ee guri siinta la xiriiro maxaa soo hoos gali ku gubidda salab dibaddda guriga dad cusub oo soo dagay iyagoo lagu dhalilaayo midibkooda, wax ka halaynta guri iyadoo loo yeelaayo midibka dadka deggan, mise u hanjabka dallaalka guri ee iibiyay guriga oo loo yeelaayo asalka qaran ee dadka laga iibiyey. Sharciga guri siinta cadaaladda leh ee dawladda federaalka ayaa sidoo kale si adag u ilaalisaa oo na u xalisaa wax yeelka, cabsi gelinta, mise ka dhexgalka xuquuqda guri siinta cadaaladda ee dadka kale. Waxay leedahay ganaaxyo dembi sharci iyo ganaaxyo madani ee ficilo noocaasi ah, sida ganaaxyo lacag iyo xabsi. Sharciyaalka mamul goboleedka iyo deegaanka ee cadaaladda guri siinta iyo sharciyaalka dembi ayaa sidoo kale ilaalin dheeraad ah noqon karaan

Buug yarahan wuxuu bixin doonaa dul mar ku saabsan talaabooyinka shakhsiyaalka, shirkadaha iyo bulshooyinka deegaanka ay qaadi karaan sifo ay si wacan uga falceliyaan dembiyaalka nacaybka ee guri siinta la xiriiro ee ku xadgudbaayo Sharciga guri siinta cadaaladda leh.

WAA MAXAY DABEECADAHA UU SHARCIGA GURI SIINTA CADAALADDA LEH MAMNUUCO?

The Sharciga guri siinta cadaaladda leh wuxuu mamnuucayaa dabeecadda dembi ee waxyeeleyso, cabsi gelineyso, mise dhex galayso afaaraha dadka kale maadaamo ay ku dhaqmaayaan xuquuqdooda guri siinta cadaaladda leh mise ay uga caawinaayaan dadka kale inay ku dhaqmaan sharciyadaasi. Dabeecad noocaasi waxaa sabab u noqon karaa nacaybka mise fakirka uu ka qabo dembiilaha qofka kale sidaa darteeda na ficilka qofkaasi mise hantidaasi la aadiyo wuxuu ku salaysan yahay midibka, asalka qabiil, qaranka, diinta, jinsiyadda, dooqa jinsiyadda loo galmoodo, mise laxaad la'aanta jireed mise maskaxeed. Dabeecad noocaasi waxay soo hoos gali ku xadgudubka dembiyeed ee xuquuqda madaniga waxaana surogal ah in lagu xukumo Sharciga Guri Siinta Cadaaladda Leh mise sharciyaalka dembiyaalka nacaybka ee dawladda gobolka iyo federaalka. Ku xadgudubyada dembiyeed ee xuquuqda madaniga maxaa soo hoos gali dembiyaalka sida gacan qaadka, dilka, guri gubinta, hanjabka dembi, mise wax halayn. Buug yarahan dhexdiisa, dabeecadda noocaasi waxaa lagu magacaabi "ficilka nacaybka."

Tilmaanta ugu wayn in ficilka nacaybka dhacay maxaa ka mid ah:

• Isticmaalka luuqadda, cayda, mise kalmadaha nacaybka mise eexashada la xiriiro ee dembiilaha
• Dhibanaha iyo marqaatigaba inay u fahmaan in dembiga la gaystay qofka loo bartilmaamaystay maadaamo uu ku jiro kooxda la ilaalinaayo.
• Dhacdooyin nooca la mid ah ee ka dhacay xaafadda.
• Hawl degmada dhexdeeda ay geysteen koox nacaybka ku midaysan.
• In lala bartilmaamaysto dembiga maalin ahmiyad gaar leh mise taarikh gaar u ah koox la ilaalinaayo.
• In la waayo sabab kale

KA FALCELINTA DEMBIYADA KU XAD GUDUBKA XUQUUQDA MADANIGA

Sifo loo horumariyo ka qayb ahaanshaha iyo loo kobciyo cadaaladda guri siinta, bulshooyinka waxaa ku habboon inay qiimeeyaan xiriirada u dhexeyso kooxaha dadka deggan iyo inay ka digtoonaadaan calaamadaha xiisadda iyo ficilka nacaybka intuu ficilka nacaybka dhicin ka hor. Madaxyada goobta iyo qareenada waa inay abaabulaan oo na hirgeliyaan istraatiijiyo loga hortagaayo xiisadda iyo ka falcelinta ficilka nacaybka.

HABKA LOO DHISO SHABAKADDA KA FALCELINTA

Rln laga qayb geliyo kooxaha bulshadda iyo madaxda sifo ay uga qayb noqdaan kooxda ka falcelinta degdegta ah. Shirkadaha waa inay ka qayb geliyaan booliska deegaanka iyo saraakiisha FBI, dadka u doodo xuquuqda madaniga, shirkadaha deegaanka ee guri siinta cadaaladda leh, u adeeg bixiyeyaalka dhibaneyaalka, madaxda diiniga, shirkadaha bulshadda ku salaysan, wakiilada, iyo xubnaha guddiga mise ururka guri iibinta deegaanka.

Aqoonso baahiyaalka bulshadda.
Baar xiriirada bulshadda, iyadoo la eegaayo ficilada hore u dhacay ee nacaybka, cabashooyinka kala sooca ee bulshadda, caga juglaynta dugsiyada deegaanka, qoraalada midibka, dadka soo galootiga, qaniisinta kasoo horjeedo ee bulshadda dhexdeeda, iyo dad badan oo kusoo biiraayo qaybta.

Aqoonso raasumaalka bulshaddaada.
Hore u sii baro maclumaadka sii jiro ee loga hortagi karo nacaybka, ay ku jiraan shirkadaha ka hortago oo na ka falceliyo ficilka nacaybka, shirkadaha cadaalada guri siinta, barnaamijyada dhalinta, farshaxanka, iyo ciyaaraha ee isu keeno dhalin yarta, fursadaha is weydaarsi diineed ee dadka diimaha kala duwan dhexdooda, iyo seminaarada sii jireen ee kala duwanaanshaha lagu horumariyo iyo lagu xaliyo dhibta.

Qeex doorka shabakadda ka falcelinta nacaybka iyo waajibaadka xubin walba.
Ka fakir oo na qeex masuuliyaadka gaarka ee xubnaha shabakadda ka falcelinta nacaybka, sida isu keenida iyo faafinta maclumaadka ku saabsan ka falcelinta ficilka nacaybka, qaadashada masuuliyadda la talinta booliska, u adeega booska "ka kormeeraha ficilka nacaybka," tababarka adeeg bixiyeyaalka iyo warbaahinta, mise bixinta adeegyada tooska iyo maclumaad kale. Magacaabidda labo mise saddex isu dubo rideyaal inay noqdaan dadka lagala xiriiraayo markii arrin guri siinta la xiriirto dhacdo.

Abaabul liiska hubinta falcelinta.
U aqoonso xubin walbo door gaar u ah ay hirgeliyaan markii lagu jiro ka falcelinta dhibaato. Caddee doorarka iyo masuuliyaadka xubin walbo ee shabakadda, qeex habraaca falcelinta, iyo abaabul halka bilowga isgaarsiinta ee shabakadda dhexdeeda hadduu ficilka nacaybka dhaco. Qof walbo oo ogaado inuu dhacay dembi nacayb waa inuu booliska waco.

AAD BAY MUHIIM U TAHAY IN ISLA MARKIIBA LAGA FALCELIYO

Haddaad aaminsan tahay inuu ficilka nacaybka dhacaayo ama inuu qof imika halis ugu jiro waxyeelo jirka, waa inaad ka falceliso isla markiiba.

•Wac 911 mise lambarka xaaladda degdegta ee deegaankaada haddii daryeel caafimaad loo baahan yahay mise hadday jirto halista rabshad sii socon doonto oo imika taagan.
•Booliska wac ee na ka warbixi faahfaahinta dhacdada.
•U raadi meel nabadgeliyo leh dhibanaha, sida guri saaxibkooda. • Diyaari warbixinta siday arrinta u dhacday.
• Hirgeli habraacyada ka falcelinta.

LIISKA HUBINTA EE KA FALCELINTA DEGDEGTA AH

BOOLISKA

✓Miyay saraakiisha xoojinta sharciga ku yimaadeen goobta dembiga waqti fiican?
✓Miyay dhibaneyaalka isla markiiba la nabadgeliyay iyo qaribitaanka hantida na laga hortagay?
✓Miyay booliska taageero siiyeen dhibanaha iyagoo qaadaayo warbixinta mise bilaabaayo baaritaanka?
✓Miyee saraakiisha xoojinta sharciga xireen dembiilaha?
✓Miyaa dhibanaha iyo marqaatiyaalka la oo na la wareystay?

DARYEELKA DHIBANAHA

✓Miyaa nabadgeliyada dhibanaha isla markiiba la xaqiijiyay?
✓Miyuu aqoon yahanka adeegyada dhibanaha joogay?
✓Miyuu joogay jiiraan daryeelin leh mise qof u doodo oo dejiyo dhibanaha islamarkii dhacdada markay dhacday ka dib?
✓Haddii xiisad ka dhax dhacday labo koox dhexdooda, miyaa dadaalo loo sameeyey ee lagu dhex dhexaadiyo mise lagu xaliyo khilaafka?
✓Miyay madaxda bulshadda si dhakhsa ah uga falceliyeen xagga raadinta xalka lagu dejiyo xiisadda mise arrinta wax loga qabto?
✓Miyaa shaqaalaha arrinta loo qoondeeyey inuu dhibanaha ka kormeero sifo loo xaqiijiyo nabadgeliyadooda iyo in laga caawiyo hawlaha la xiriira tusaale, wax hagaajinta, buuxinta codsiyaalka magdhawga caymiska)?
✓Hadday khuseyso, miyaa dadaal wadajir loo sameeyey in lagu qanciyo dhibanaha inuu ku jiro bulshadda?
✓Hadday khuseyso, miyaa guri beddelaad mise ku meel gaar ah loo diyaariyay dhibanaha?
✓Miyuu xubinka shabakada, qareenka, mise deriska booqdeen dhibanaha maalinka iyo isbuuca ka dambeeyey dhacdada?
✓Miyey shabakadda u abaabuleen oo na u hirgeliyeen qorshaha mudada dheer ee loga kormeero dhibanaha?